

U AKHRI ILMAHA

Lue lapselle (somalii)



Kuva: Sven Brandsma / Unsplash



Waqti wadajir oo akhriska ah


U akhrinta ilmaha, u sheegidda sheekooyinka iyo ku celcelinta tixaha gaagaaban waa hab wanaagsan oo lagu qaato waqti wadajir ah. Ilmaha si joogto ah ugu akhri.

Bilow waqtiyada wadajirka ah ee akhriska marka ilmuhu yahay ilmo yar oo nuug ah. Si wadajir ah u fiiriya buugaagta sawirrada leh oo magacaaba waxa sawirrada ka muuqda ama ka dhacaya. Marka ilmuhu koro, doorta buugaag ay ku jiraan qoraal badan. Sii wad waqtiyada akhriska xitaa marka ilmuhu gaaro da'da iskuulka.

*Imisa jeer ayaad ilmahaaga wax ugu akhridaa?
Luqaddee?*

*Waa maxay buuggiisa ama sheekadiisa uu ugu
jecel yahay?*

*Miyaad ilmahaaga la tagtaa maktabadda?
Ma leeyahay buugaag u gaar ah?*



Kuva: Teo Zac / Unsplash



Kuva: OleksandrPidvalnyi / Pixabay

Waqtiga akhriska waxaa la joogaa meel isu dhow. Sidan waxaa ku xoogaysta dareenka ilmaha ee ah inuu adiga muhiim kuu yahay.

U akhrinta ilmaha waxay taageertaa horumarka luqadda ilmaha siyaabo badan. Isla mar ahaantaana, bulshanimada ilmaha, mala-awaalkiisa iyo damqashadiisu way xoogaystaan.

Luuqado badnidu waa hodannimo

Uurkaaga ku sheeg sheekooyin oo ugu akhri buugaag afka hooyo. Aqoon wanaagsan oo afka hooyo ahi waxay ka caawisaa barasho kasta. Waxaad sidoo kale isla baran kartaan af-Finnish adinka oo wada akhrinaya buugaag Finnish ah. Luqadaha kala duwani way is taageeraan. Barashada af-Finnish-ka waxaa siyo waddooyin badan loogu taageeraa xannaanada iyo dugsiga.



Kuva: Multimediosds / Pixabay

*Il, il, sankka, afka,
Dhaban, dhaban iyo lafta garka.
Gacan, gacan, caloool iyo xuddun,
Lug, lug iyo faraha cagaha.
Il, il, sankka iyo afka,
Hooyo / aabbe adiga ayuu ku
jeclaadaa.*

Buugaagta carruurta ee af-Finnish-ka ah ee caanka ah

- Tatu ja Patu –kirjat (Aino Havukainen ja Sami Toivonen)
- TAM-TAM menee päiväkotiin (Josefine Sundström)
- Onni –poika saa uuden ystävän (Sanna Pelliccioni)

Dooro buugaag ku habboon heerka koritaanka ilmaha oo kala duwan.

WAX DHEERAAD AH KA WEYDII MAKTABADDA!

Halkaas waxaad ka heli doontaa buugaag ku qoran luqado kala duwan.



**Euroopan unionin
osarahoittama**

Mashruuca Niitty 2 2023–2026

*Wadajir loogu shaqaynayo nolol-maalin leh oo wanaagsan ee
qoysaska soo galootiga ah.*

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan mashruuca:
projects.tuni.fi/niitty2

Albaabka macluumaadka qoysaska: tuni.fi/perheinfo

Hagahan waxaa laga faa'iidaystay agabka Opetushallitus.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan mowduucan:

[Esitteet eri kielillä - Lue Lapselle](#)

Kuvat: Unsplash ja Pixapay (ladattu 10.4.2025)



**Pirkanmaan
hyvinvointialue**



TAMPERE